

Su'aalaha la  
weydiinayo Adeegyada  
Family Day Care

SOMALI



Australian Government  
Department of Education and Training



NSW FAMILY DAY CARE  
ASSOCIATION INC.

## QALABKA MACALINKA FAMILY DAY CARE:

# Su'aalaha la weydiinayo Adeegyada Family Day Care

Haddii aad kafakareysid in aad noqotid, ama aad ku dhawaatay in aad noqotid, macalinka Family Day Care waa in aad iska diiwaangelisaa adeega Family Day Care.

Macalimiinta Family Day Care waa dad bixiyaa waxbarashada carruurnimada la oggolaaday iyo daryeelka inta badan lagu siiyo carruurta yar-yar guriga gaarka ah ee macalinka.

Adeega Family Day Care ayaa uga qeybgeliya macalimiinta sida midkood shaqaalaha ama qandaraaslayaasha ganacsiga yar si ay uga qeyb noqdaan adeegooda. Adeega waa bixiyaha daryeelka carruurta lagu ansixiyay sida waafaqsan labadaba Sharciga Qaranka iyo Sharciga Caawinta Qoyska, inkastoo macalimiinta ay yihiin kuwa daryeelo carruurta.

Doorashada nooca adeega Family Day Care si aad iskaga diiwaangeliso go'aan muhiim ah – waxaad u baahantahay in aad hubisid in aad iska diiwaangelisid midka aad aaminsantahay oo ku siinayo adeega iyo caawinta aad u baahantahay.

### Maxay sameeyaan adeegyada Family Day Care?

- ▶ Waxay hubiyaan in aad tahay qof u qalmo inuu wax baro oo daryeelo carruurta.
- ▶ Waxay qiimeeyaan gurigaaga si loo hubiyo in ay badbaado iyo ammaan u tahay carruurta kujirto daryeelkaaga.
- ▶ Waxay leeyihiin xeerar iyo nidaamyada aad raaci kartid si ay kaaga caawiso in ay kadhigto shaqadaada sida macalinka mid sahlan iyo si aad u hubisid in aad sameysid waxa sharciga kaaga baahanyahay in aad sameysid.
- ▶ Waxay hubiyaan in aad hubisid in aad leedahay caymiska, u qalmida iyo shahaadooyinka aad ugu baahantahay sida macalin ahaan.
- ▶ Waxay kusiiyaan nidaamka tababarka marka aad bilowdid in aad u shaqaysid sida macalinimo.
- ▶ Waxay kugu soo booqdaan si joogto ku saleysan si loo hubiyo in aad u daryeeleysid carruurta si ku haboon.
- ▶ Waxay kugu caawiyaan in aad si joogta ah u hormarisid tayada waxbarashada iyo daryeelka aad siisid carruurta.
- ▶ Waxay maamulaan qidmada daryeelka carruurta Dowlada Australia ee matalaada u qalmida qoysaska aad daryeelka siisid.
- ▶ Waxay ku dalacaan qoysaska qidmooyinka waxbarashada iyo daryeelka aad siisid carruurta.
- ▶ Waxay ku siiyaan mushaarkaaga, ama haddii aad ku shaqeyneysid si kusaleysan heshiiska, rasiidkaaga.

- ▶ Waxay ku siiyaan adiga hormarinta xirfada socoto (tababarka).
- ▶ Kuwa kore oo dhan, waa inay kugu caawisaa hubinta in aad raaceysid Sharciga Qaranka iyo Qaanuunada oo wuxuu u hogaansanyahay Sharciga Caawinta Qoyska sida macalinka Family Day Care.

### Sidee ayaad uga shaqeyn kartaa diiwaanka adeega Family Day Care ugu wanaagsan?

Sababtoo ah waxaa jiro dhoor adeegyada Family Day Care ee aad dooran kartid si aad isaga diiwaangeliso, waxaad u baahantahay in aad hubisid in aad ku faraxsantahay midkaaad go'aansatay.

Si ay kaaga caawiso in aad dooratid mida kuugu wanaagsan, garaac ama booqo mid walba oo adeegyada. Weydii iyaga su'aalaha looga shaqeynayo sida ay kuuga caawin karaan iyo waxa ay kaaga filanayaan sida macalinka Family Day Care. La hadal macalimiinta kale ee ka diiwaangashan adeega. Adeega miyuu leeyahay sumcad wanaagsan? Waa maxay qiimaha tayada adeega? (Weydii iyaga ama waxaad ka eegi kartaa intarneetka ee

[www.startingblocks.gov.au/find-child-care](http://www.startingblocks.gov.au/find-child-care))

### Su'aalo noocee ayaa ah in aad weydiiso adeegyada Family Day Care?

Su'aalaha kugu caawinayo adeeg ee Family Day Care ayaa ah in aad iska diiwaangelisid oo ay ku jiraan:

- ▶ Miyaad **kashaqeyneysaa** adeega ama aad **heshiis hoose la gashay** iyaga?
- ▶ Qidmooyinke iyo canshuurahee ayay ku soo dalacaan macalimiinta iyo qoysaska?
- ▶ Imisa macalimiinta ayaa kala diiwaangashan iyaga iyo imisa xiriiriyayaal ayay shaqaaleysiiyaan? (Xiriiriyayaasha waa shaqaalaha adeega ee kugu taageerayo sida macalinka.)
- ▶ Miyay kugu taageerayaan in aad heshid sharuudaha?
- ▶ Sidee sareyso ayay tahay daqliyadooda macalimiinta? (Haddii macalimiinta ay joogaan muddo ka dheer waa astaanta inay ku faraxsanyihiin adeega Family Day Care.)
- ▶ Hormarkee xirfada iyo taageeradee ayay siiyaan macalimiinta?
- ▶ Intee jeer ayay ku soo booqanayaan?
- ▶ Miyay bixiyaan faa'idooyin dheeraad ah sida ciyaarta kooxda, halka aad keentid carruurta ku jirto daryeelkaaga si ay ula ciyaaraan carruurta kale?



## HUBI INAY RAACAAN SHARCIGA!

Miyuu qof kugu casuumay in aad noqotid macalinka Family Day Care iyo si aad isaga diiwaangelisid adeegooda? Waa muhiim in aad garanaysid waxa aad ogolaaneysid. Haddii adeega Family Day Care jabiyoo sharciga ama sameeyo qiyaano waxaad masuul ka noqoneysaa sida mid ka mid ah macalimiintooda. Hubi inay daacad kaa tahay adeeg walba ee Family Day Care ee aad isaga diiwaangelisay, ma ahan jabinta Sharciga Qaranka oo wuxuu u hogaansanyahay Sharciga Caawinta Qoyska.

### Qodobada muhiimka ah

- ▶ Marka aad bilowdid ganacsigaaga gaarka ah ee Family Day Care waa in aad iska diiwaangelisaa adeega Family Day Care ee la ansixiyay.
- ▶ Macalimiinta Family Day Care waxay ku shaqeeyaan sida waafaqsan jaheynta adeega Family Day Care.
- ▶ Mararka qaar macalimiinta iskood ayay u shaqeystaan laakin mararka qaar waxay ku shaqeeyaan adeega.
- ▶ Adeega Family Day Care ee aad iska diiwaangelisid waa mid ka mid ah go'aamada ugu muhiimsan ee aad sameyneysid oo aad ku dajineysid ganacsigaaga Family Day Care. Waa muhiim in aad weydiiso su'aalo badan ee lagu hubinayo in aad ku faraxsantahay adeega aad dooratay.
- ▶ Adeegyada Family Day Care waa inay siiyaan taageero kala duwan macalimiinta ka diiwaangashan iyaga. Kuwaan waxaa ku jiro nidaamka tababarka, hormarinta xirfada socota iyo taageerada joogtada ah.
- ▶ Qaar ka mid ah adeegyada Family Day Care wuxuu bixin karaa qidmooyinka maamulka hoose oo ku dalacaa laakin aan bixin adeega aad u baahantahay. Ha iska diiwaangelin kaliya adeega ugu raqiisan.
- ▶ Ha iska diiwaangelin adeega Family Day Care ee aad ka shakisay inay jabineyso Sharciga Qaranka iyo Sharciga Caawinta Qoyska. Tani waxay ku gelin kartaa halista jabinta sharciyada sidoo kale.
- ▶ Wadada ugu wanaagsan ee lagu hubinayo in laguugu taageeray shaqadaada sida macalinka Family Day Care iska diiwaangeli adeega Family Day Care ee kugu taageero iyo cida aad aaminsantahay.

## SU'AALAHA INTA BADAN LA IS WEYDIIYO

### Ma inaan iska diiwaangeliyaa adeega Family Day Care?

Haa. Si aad u noqotid macalinka Family Day Care waa in aad ka diiwaangashanaataa adeega Family Day Care la ansixiyay.

### Miyay jiraan noocyo kala duwan ee adeegyada Family Day Care?

Haa. Qaarkood ma ahan hay'adaha aan faa'ido doonka aheyn. Qaarkood waa ganacsadayaal. Qaarkood waxaa maamulo maamulada iyo samafalada deegaanka.

### Sidee ayaan u go'aansadaa adeega aan iska diiwaangelinayo?

Tixgeli waxyaabaha sida:

- ▶ Taageerada ay ku siinayaan.
- ▶ Noocyada tababarka ay bixiyaan marka aad bilaabeysid.
- ▶ Qidmooyinkeer iyo canshuurahee ayay ku soo dalacaa macalimiinta iyo qoysaska.
- ▶ Hormarkee xirfadee/tababarkee ayay bixiyaan.
- ▶ Intee jeer ayay ku soo booqanayaan.
- ▶ Muxuu yahay qiimeynta tayada adeega. (Waxaad ka eegi kartaa midaan [www.startingblocks.gov.au/find-child-care](http://www.startingblocks.gov.au/find-child-care))
- ▶ Sidee wanaagsan ayaad u mooday inay u raacaan Sharciga Qaranka iyo Qaanuunada iyo Sharciga Caawinta Qoyska ee la xiriira kaalmooyinka daryeelka carruurra ay ku maamulaan matalaada qoysaska u qalmo ee Dowlada.



## TALLADA QADKA DANSAN

Haddii aad ka walaacsantahay qiyaanada dhaceyso, waxaad la xiriiri kartaa Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka Dowlada Austreeliya tallada qadka dansan ee Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka tallada qadka dansan ay la jiraan sharaxaado gaar ah ee 1800 664 231 ama i-meelka [tipoffline@education.gov.au](mailto:tipoffline@education.gov.au). Waxaad ahaan kartaa qarsoodi haddii aad rabtid.



## SU'AALAH A INTA BADAN LA IS WEYDIIYO SII SOCOTAY

### Halkee ayaan ka helaa adeegyo badan?

Si aad u heshid adeegyada kuu dhow, booqo [www.fdca.com.au](http://www.fdca.com.au) and click the 'find childcare' tab.

### Maxaan ka walaacaa?

Ka walaac haddii aad u moodo in adeega jabinayo Sharciga Qaranka iyo Sharciga Caawinta Qoyska.

Ka walaac haddii waxa ay bixinayaan u muuqdo inuu aad ugu wanaagsanyahay inuu dhab yahay.

### Sharciyadee iyo qaanunadee daboolo Family Day Care?

Waxaa jiro tiro sharciyada maamulo sida adeegyada Family Day Care iyo macalimiinta u ku shaqeeyaan.

Sharciyada ugu muhiimsan waa:

- ▶ Adeegyada Waxbarashada iyo Daryeelka Sharciga Qaranka [www.acecqa.gov.au/national-law](http://www.acecqa.gov.au/national-law)
- ▶ Adeegyada Waxbarashada iyo Daryeelka Qaanunada Qaranka [www.acecqa.gov.au/national-regulations](http://www.acecqa.gov.au/national-regulations)
- ▶ Sharciga Caawinta Qoyska: [www.education.gov.au/family-assistance-law-0](http://www.education.gov.au/family-assistance-law-0)

## WAX BADAN KA OGOW

Ma xiiseyneysaa? Wax badan ka ogow adiga oo booqanayo websaydyadaan:

- ▶ [www.education.gov.au/compliance](http://www.education.gov.au/compliance)
- ▶ [www.fdcsupport.org.au](http://www.fdcsupport.org.au)
- ▶ [www.fdca.com.au](http://www.fdca.com.au)
- ▶ [www.acecqa.gov.au](http://www.acecqa.gov.au)

ama adiga oo booqanayo adeega Family Day Care ee adiga kuu dhow. (Si aad u heshid adeegaaga kugu dhow, booqo [www.fdca.com.au](http://www.fdca.com.au) oo riix badhanka 'find childcare'.)



Australian Government  
Department of Education and Training



NSW FAMILY DAY CARE  
ASSOCIATION INC.